

Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha

Macluumaad loogu talagalay qoysaska

Maxaa laga wadaa PASRR?

Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha (PASRR) waa hab baaritaan iyo qiimeyn loogu talagalay dadka loo wareejiyay xarun daryeel kalkaalintan oona la oggaaday in ay qabaan naafo caqliga ah ama xaalad la xiriirta. Barnaamijkan wuxuu ku caawinayaa in uu bixiyo adeego dheeri ah oo ay dhici karto in ay u baahanyihiin dadkan sidoo kale wuxuu ku caawinayaa dadka doonaya in ay ku noqdaan bulshadooda in ay helaan taageerooyinka ay u baahanyihiin.

Adeegaha shakhsiyeed ee laga bixiyo dhinaca Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha waxaa loogu talagalay in ay ku caawiyaan dadka in ay kororsadaan xirfado shaqo, ahaadaan kuwo madax banaan oona sii wadaan xiriirka ay la leeyihiin bulshadooda. Qofkasta oo ka qaata adeegaha tooska barnaamijka Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha wuxuu leeyahay qiimeyn qofka-kusaabsan midaas oo xadideysa baahooyinka iyo adeegaha la bixin doono. Adeegaha waxaa kamid noqon kara tababarid-saaxiib ama qoys, dhexgelid bulsho, shaqaalayn ama taageerooyin dhaqameed, daaweyn hab dhaqan ama qalab tiknoolojiyad caawimaad leh.



Su'aalaha inta badan la weydiyo ee kusaabsan Barnaamijka

Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha:

Qoysasku maka qayb galayaan qiimeynta Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha lagu samaynayo xubinka qoyska?

Qoysaska waxaa lagu boorinayaa in ay kasoo qayb galaan qiimeynta Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha lagu samaynayo dadka ay jecelyihiin, haddii ay midaasi tahay waxa ay doonayaan xubnaha qoyska qiimeynta lagu sameynayo. Masuuliyiinta sharciga ah sidoo kale waxaa lagu casuumayaa in ay kasoo qayb galaan.



Ma yihiin adeegaha Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha mid la helayo kadib marka qofka laga soo saaro xarunta daryeelka kalkaalinta?

Adeegaha gaarka ah ee Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha waxaa laga xadidey dhinaca xeerarka Caawimaada caafimaadka dowlada waxaana helaya dadka qaba naafo caqliga ah ama xaalad la xiriirta kaliya

marka ay kujiraan hoosta daryeel xarunta kalkaalinta ah. Kadib marka qofka laga saaro xarunta waxaa dhici karta in uu u qalmo taageerooyin bulshadeed oo badan. Qiimeeyaha Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha wuxuu ku caawinayaa in uu u wareejiyo macamiisha barnaamijyada ay dhici karto in ay u qalmaan.

Ma ahaan doonaan dadka ku lug leh barnaamijka Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha kuwo laga saaro xarunta kalkaalinta kahor inta aysan diyaar noqonin?

Dadka qaar waxay wel-wel ka qabaan in xubinka ka tirsan qoyskooda lagu khasbo in uu ka tago xarunta kalkaalinta kahor inta uusan diyaar noqonin. Waxii kusaabsan deganaha ama dadka degan Washington, u qalmida xarunta daryeelka kalkaalinta waxaa lagu xadidaa xaalada caafimaad ee qofka iyo taageerooyinka uu u baahanyahay. Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha kama dhigayso qofka in uu ka tago xarunta kalkaalinta kahor inta uusan diyaar noqonin.

Macluumaadka marwalba waxaa loogu helaa qaab bedelaadyo leh gudaha bulshada dadka doonaya iyo kuwa awooda in ay ka tagaan xarunta daryeelka kalkaalinta.

Ka oggaw wax badan ee kusaabsan barnaamijka Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha boggaan internetka ah dshs.wa.gov/pasrr

Laxiriir Kooxda Baaritaanka kahor-Oggolaanshaha iyo Muraajacaynta Deganaha ee jooga goobtaada!

Loogu talagalay macamiisha ku qaadnaya adeegaha gudaha **Adams, Chelan, Douglas, Grant, Ferry, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille Spokane, Stevens** ama **Degmooyinka Whitman** wac (509) 329-2900 ama iimayl ugu dir kooxda cinwaankan DDAR1pasrrteam@dshs.wa.gov

Loogu talagalay macamiisha ku qaadnaya adeegaha gudaha **Asotin, Benton, Franklin, Garfield, Kittitas, Klickitat, Walla Walla** iyo **Degmooyinka Yakima** wac (509) 225-7970 ama iimayl ugu dir kooxda cinwaankan DDAR1pasrrteam@dshs.wa.gov

Loogu talagalay macamiisha ku qaadnaya adeegaha gudaha **Island, San Juan, Skagit, Snohomish** ama **Degmooyinka Whatcom** wac (425) 339-4833 ama iimayl ugu dir kooxda cinwaankan DDAR2pasrrteam@dshs.wa.gov.

Loogu talagalay macamiisha ku qaadnaya adeegaha gudaha **Degmada King** wac (206) 568-5700 ama iimayl ugu dir kooxda cinwaankan DDAR2pasrrteam@dshs.wa.gov.

Loogu talagalay macamiisha ku qaadnaya adeegaha gudaha **Clallam, Jefferson, Kitsap** ama **Degmooyinka Pierce** wac (253) 404-5500 ama iimayl ugu dir kooxda cinwaankan DDAR3pasrrteam@dshs.wa.gov.

Loogu talagalay macamiisha ku qaadnaya adeegaha gudaha **Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Lewis, Mason, Skamania, Thurston** iyo **Degmooyinka Wahkiakum** wac (360) 725-4250 ama iimayl ugu dir kooxda cinwaankan DDAR3pasrrteam@dshs.wa.gov.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

SOMALI